

Ku Saabsan Hagahan

Hagahan waxa ku jira dulmar tillaabooyinka lagu sameenayo akoonka Gelitaanka Amni-sugan ee Washington (Secure Access Washington, SAW) iyo ku darista Bogga Intarneetka ee Ka qeybqaataha Xafiiska Dacwad Dhegeysiga Maamul (Office of Administrative Hearings, OAH).

Ku saabsan Gelitaanka Amni-sugan ee Washington (Secure Access Washington) ee Washington (Secure Access Washington) iyo Bogga Intarneetka ee Ka qeybqaataha (Participant Portal)

Gelitaanka Amni-sugan ee Washington (Secure Access Washington, SAW) waa madasha martigelisa adeegyada onlaynka lagu bixiyo ee inta badan wakaaladaha gobolka Washington. Waxay siisaa madal amni-sugan wakaalad kasta, taasoo awood kuu siinaysa inaad ka hesho adeegyo badan onlaynka.

Haddii aad rafcaan ka heysato Xafiiska Dacwad Dhegaysiga Maamul (Office of Administrative Hearings, OAH), waxaad ka eegi kartaa faylalka kiiskaada onlaynka adoo isticmaalaya Bogga Intarneetka ee Ka qeybqaataha. Tani waxay kuu ogolaaneysaa inaad ka soo dejisato oo aadna eegto koobiyada dukumeentigaaga faylka ku jira (oo ay ku jiraan duubista maqaleed ee dacwad dhegeysigaaga), ka cusboonaysiiso lambarada taleefanka ama ciwaannada iimaylka oo aad dib u eegto ciwaankaaga boostada.

Waxaad arki kartaa taariikhda iyo wakhtiga dacwad dhagaysigaaga – oo waxaadna arki kartaa dukumentiyada ka hor intaysan kuugu iman boostada. (Dhammaan dukumeentiyada waxaa lagu soo diraa boostada iyadoo la adeegsanayo ciwaanka faylka ku qoran.)

Ugama qeybgaleysid Dacwad Dhageysigaaga adiga oo adeegsanaya Bogga Intarneetka ee Ka qeybqaataha!

Fiiro gaar ah: Bogga Intarneetka ee Ka qeybqaataha waxa uu ku tusin doonaa dhamaan dukumeentiyada/aqoonsiyada (racfaannada) ku xidhiidhsan Aqoonsigaaga Ka qeybqaataha.



Wixii caawinaad ah, fadlan wac **+1-800-583-8271** inta u dhaxeysa 7 subaxnimo iyo 5 galabnimo Isniin ilaa Jimce, marka laga reebo maalmaha fasaxa.

Maxaan u baahanahay ka hor intaanan bilaabin?

Warqad kasta oo ka imaatay OAH waxaa ku jiri doona warqadda ciwaanka oo ay ku qoran yihiin tilmaamo iska fudud oo ku saabsan sida loo galo Bogga Intarneetka ee Ka qeybqaataha. Boggan waxa ku jira macluumaadka aad u baahan tahay si aad u dhammaystirto hawshan:

Waxaa Dib U Eegay Markii Ugu Danbeysay 01/17/24 P. Muirhead

SAW - quick guide | Reviewed 1/17/2024 | Translated 6/2025

- Koodhka Adeegga ee SAW (SAW Service Code)
- Lambarka Aqoonsiga (Docket Number)
- Aqoonsadaha Ka Qeybqaataha (Participant Identifier, PID) (Participant Identifier)

Hadda raac tillaabooyinkan si aad u sameysato akoon SAW, ka dibna ku dar oona marin u hel Bogga Intarneetka ee Ka qeybqaataha:

1. Ka sameyso akoon barta <https://secureaccess.wa.gov>
2. Guji **Add A New Service (Ku dar Adeeg Cusub) (Add A New Service)**
3. Dooro **I have been given a code (Waxaa la isiisay koodh) (I have been given a code)**
4. Geli Kaaga ah **Koodhka Adeegga ee SAW (SAW Service Code)**
5. Guji **Participant Portal (Bogga Intarneetka ee Ka qeybqaataha) (Participant Portal)**
6. Xaqiijinta hababka badan: dooro habka gaarsiinta si aad u hesho koodhka. *Waxaa lagu taliyaa inaad isticmaasho farriinta gaaban.*
Geli koodhka ka dibna xaqiiji gelitaanka Bogga Intarneetka ee Ka qaybqaataha.
7. Add Your Case (Ku dar Kiiskaada) adigoo isticmaalaya **Docket Number(Lambarka Dukumeentiga) (Docket Number)** iyo **Participant Identifier (Aqoonsadaha Ka Qeybqaataha) (Participant Identifier)**

Miyaad u baahan tahay caawimo dheeraad ah?

Guji mid ka mid ah linkiyadan soo socda:

- Sida loo sameysto akoon SAW oona loo galo Bogga Intarneetka ee Ka qaybqaataha (kaliya ku qoran Ingiriisi) – [Hagaha oo Dhameystiran.](#)
- Sida loo isticmaalo Bogga Intarneetka ee Ka Qeybqaataha – [Hagaha Dhakhsada ah](#) ama [Hagaha oo Dhameystiran](#) (kaliya ku qoran Ingiriisi).